

## Kani waa BankID

BankID waa nooc ka mid ah aqoonsiga elektarooniga ah kaas oo u sahlaya shirkadaha, bangiyada, ururrada iyo hay'adaha inay aqoonsadaan, ayna galaan heshiisyo lala galo shakhsiyaadka gaarka ah iyada oo loo marayo internetka. BankID waa dokumenti aqoonsi elektaroonik ah oo la barbardhigi karo baasaboortan, liisan darawalnimo ama dokumenti aqoonsi kale.

## Aqoonsigan elektarooniga ah waxaa bixiya bangiyada

Qof kasta oo gaar ah oo leh lambarka aqoonsiga shakhsi ahaaneed ee Swedish wuxuu bangigiisa ka heli karaa BankID. BankID wuxuu leeyahay qiimo isku mid ah waxaana loo isticmaalaa si isku mid ah iyada oo aan loo eegin bangiga ay soo saaray.

## BankID si ballaadhan (aad) ayaa loo isticmaalaa

Bangiyada siiya BankIDs shaqsiyaadka gaarka ah waxaa ka mid ah Danske Bank, ICA Banken, Ikano Bank, Handelsbanken, Länsförsäkringar Bank, Nordea, SEB, Skandiabanken, Sparbanken Syd, Swedbank iyo Ålandsbanken. Guud ahaan, bangiyadani waxay leeyihiin 8 milyan oo macaamiisha bangiga ka isticmaala internetka ah kuwaas oo awood u leh inay ku isticmaalaan BankID-ga internetka-iyo bangiyada taleefanka gacanta, iyo hay'adaha dawladda, degmooyinka iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay. Sanadka 2017, waxaa lagu qiyaasay in BankID la isticmaali doono ku dhawaad 2.5 bilyan jeer.

Qaar badan oo ka mid ah kuwa isticmaala aqoonsiga elektarooniga ah maanta ayaa doortay BankID. Tusaale ahaan, meelaha kale ee bixiya aqoonsiyada elektarooniga ah waxa kamid ah Telia.